



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Agoosto 23, 2022

Ku socota: Hay'adaha maamulka kiiska (CME-yada) iyo daryeel bixiyayaasha
Ka socota: Anna Lansky, Agaamisa Ku-xigeenka, Xafiiska Adeegyada
Naafanimada Korriinka
Ujeedada: Macluumaadka cusub ee Compass Project

Waxaanu heer muhiim ah ka gaarnay Compass Project ee hirgelinta
heerka lacageed ee Luulyo 1. [Waad ku mahadsan tihiin, mar kale](#),
shaqadiina si aad tani uga dhigtaan mid guul leh. Waxaan ku
faraxsanahay in aan idiin sheego waxa ka xiga.

Saacadaha guriga-dhexdiisa

Dib ayaan u dhigaynaa iyada oo lagu saleynayo saacadaha ay heli karaan
dadka iskood u nool ama guryaha qoysaska ka tirsan Qiimeynta Baahiyaha
ee Oregon (ONA) iyo kooxaha adeega. Waan idinla soo socodsiin doonaa
marka waqtiga loo qabtay tani uu kala cadaado.

Sababta dib u dhaca: Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid ayaa kula
taliyay ODDS in ay kharash gareyso dhammaan maalgelinta Xeerka Qorshaha
Samata-bixinta Maraykanka (ARPA) ka hor inta aan la sameyn isbeddeladani.
Waa in aanu ilaalino joogteynta shuruudaha dadaalka ee ARPA.

Noocyada hay'ada guriga-dhexdiisa ee loogu talagalay taageerada nolosha bulshada.

Waxaanu helnay jawaab celin wanaagsan oo ku saabsan noocyada hay'ada
guriga-dhexdiisa markii la joogay kulamadii shaqada ee dhawaan iyo guddiga
tala-bixinta sharciga. Halkan waxaa ku qoran natiijooyinka kulamadani:

- Waxaanu hore ugu sii wadnaa hirgelinta nooca hay'ada caadiga ah
ee bilaabmay Luulyo 1. Xeerarka joogtada ah ee aan soo jeedinay
waxay ka turjumi doonaan wixii aan ka maqalnay kulamadani.

- Waxaanu filaynaa in xeerarka joogtada ah ee nooca hay'ada caadiga ah uu dhaqan galo dhammaadka Diisambar 2022.
- Waxaanu u baahanay waqti dheeraad ah oo aanu ku horumarino nooca hay'ada shaqo-bixiyaha ah, oo hore loogu yaqaanay "agency with choice" ee ka tirsan Sharciga Senate-ka 1548.
- Waxaanu joojinaynaa dejinta xeerka ee ku aadan nooca hay'ada shaqo-bixiyaha ah si loo raadsado jawaab celin dheeraad ah oo ka socota hawl-wadaagayaasheena oo ku saabsan noocani.

Dib u habaynta ISP

ODDS ayaa dib u bilaabaysa dib u habaynta Qorshaha Taageerada Shakhsi (ISP) oo lala leeyahay qandaraaslayaal cusub. Hadafka ugu weyn ee laga leeyahay mashruucani waa in la wanaajiyo nidaamka qorsheynta iyo macluumaadka. Waxay:

- Nidaamka ka dhigi doontaa mid u sahlan dadka oo dhan in ay isticmaalaan oo fahmaan.
- Sameyn doontaa nidaam iyo macluumaad si fiican u matalaya qof kasta, baahiyahooda iyo hadafkooda.
- Dhageysan doontaa codadka iyo aragtida kala duwan.
- Bixin doontaa kala doorashooyin dheeraad ah oo ah sida loo sameeyo qorsheynta iyo sida loola socdo.

Kooxda dib u habaynta ISP ayaa qaban doonta fursado aad kula wadaagtaan fikradahaaga. Waxaan qorsheynaynaa in aan idinla wadaagno waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan nidaamkani Oktoobar.

Waqtiga loo qabtay waxyaabaha kale

Halkan waxaa ku qoran macluumaad cusub oo ku saabsan waqtiga dhowr waxyaalood oo dheeraad ah oo aan sameynayno si loo wanaajiyo nidaamkeena. Tani way isbeddeli kartaa maadaama waqtigu ku xiran yahay maalgelinta, horumarinta sharciga, siyaasad dejinta, ansixinta sharci-dejinta iyo waxyaabo kale.

- Inta lagu jiro 2023, waxaanu sii wadi doonaa in aanu ka shaqeyno cusbooneysiinta siyaasada iyo noocyada qiimaha lacageed ee loogu talagalay adeegyada nololaha la taageero. Waxaanu rajeynaynaa in aanu tani dhammeystirno waqti dambe oo ka tirsan 2023.

- Sanadka 2023, waxaanu bilaabi doonaa horumarinta noocyada lacag bixinta daryeelka ilmo korsiga oo ku saleysan ONA. Hadafkayagu waa in la hirgeliyo noocyadani horraanta 2024 iyada oo ku xiran maalgelinta.
- Ma aynaan go'aansan goorta aanu cusbooneysiin doona lacag bixinta daryeelka ilmo korsiga.

Haddii aad hayso wax su'aalo ah, fadlan email u dir ODDS.info@odhsoha.oregon.gov.

Si Daacadnimo leh,

Anna Lansky
Agaamisa Ku-xigeenka
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.